

Macmiilka xerada qaxootiga – sidaan samee haddii xeradaada qaxootiga la xiro

Waxaan ku khasbanaannay in aan xirno xeryaha qaxootiga, sababtoo ah tirada macaamiisha xerada ayaa si weyn hoos ugu dhacday. Tirada macaamiisha ayaa yaraatay, sababtoo ah dadka magangalyoddoonka ah iyo kuwa helaaya badbaada kummeelgaarka ah ayaa yaraaday, waxaana sidoo kale jiray dad ka baxay xeryaha qaxootiga oo u guuray degmooyinka. Sidaas darteed, sidoo hore oo kale uma sii wadi karno inaan haysanno tiro isku mid ah oo goobaha hoyga ah.

Haddii aad tahay qof u baahan inuu guuro, waxaad caawimaad ka heli doontaa xeradaada qaxootiga

Xeradaada qaxootiga ayaa si gaar ah kuula soo xiriiri doonta adiga iyo dhammaanba macaamiisha xerada. Xerada qaxootiga ayaa adiga kuu sheegeysa goorta ay tahay in aad ka guurto degaanka aad hadda deggan tahay, iyo sida aad u diyaarsan lahayd hoygaaga mustaqbalka. Waxaad xaaladdaada kala hadli kartaa shaqaalaha xerada qaxootiga.

Akhri fursadaha aad ku diyaarsan karto hoygaaga mustaqbalka

1. Degmada (Kotikunta)

- Waa inaad si degdeg ah u codsataa degaanka degmada, haddii:
 - aad haysato sharciga badbaadada kummeelgaarka ah oo aad Finland si joogto ah ugu noolayd muudo hal sano ah.
- Marka aad hesho degaanka degmada:
 - Waxa aad xor u tahay inaad go'aansato meesha aad degayso, islamarkaana aad degaankaaga u diyaarsato qaabka aad adigu doonaysid.
 - Haddii aad hadda deggan tahay guri ay xerada qaxootigu ku siisay, weydii xeradaada qaxootiga, haddii ay suurtaggal kuu tahay in heshiiska kirada lagugu soo wareejin karo iyo in kale. Haddii heshiiska kirada adiga lagugu soo wareejin karo, waxaa kuu suurtaggal ah in marka aad hesho xuquuqda degaanka degmada kaddib aad ku sii noolaato guriga aad hadda deggan tahay.
 - Waxaad leedahay mid la mid ah xuquuqaha iyo adeegyada kuwa dadka Finland sida joogtada ah ugu nool oo kale. Xuquuqahaagu waa ay ka ballaaran yihiin kuwa macaamiisha xerada qaxootiga.
 - Ma noqon doontid mar dambe macmiil ka firsan xerada qaxootiga,
 - Isbeddellada xeryaha qaxootiga kuma saamayn doonaan adiga.
 - Waxaad Kela-da ka codsan kartaa dhaqaalaha nololmaalmeedka (toimeentulotuki) iyo kaalmada hoyga (asumistuki) ee dhanka nolosha iyo degaanka. Weydii xeradaadada caawimaadda ku saabsan qorsheynta dhaqaalahaaga.

- Waxaad fiiri gaar ah u yeelataa in habraaca guuritaankaagu uu qaadan karo wakhti. Sida ugu dhakhsaha badan ula xiriir xeradaada qaxootiga, si xaaladdaada looga baaraandego oo ay hore ugu socoto.
- Degaanka degmada waxaad ka codsataa xafiiska dhijitaalka iyo macluumaadka dadweynaha (Digi- ja väestötietovirasto):
 - Hagista loogu talaggalay dadka helay sharciga badbaadada kummeelgaarka ah: dvv.fi/ohjeita-ukrainasta-saapuville
 - Hagista loogu talaggalay dadka helay magangalyada caalamiga ah: dvv.fi/kotikunta.
- Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaala talin doona arrimaha la xiriira codsiga degaanka degmada. Waxa kale oo aad heli doontaa caawimaad dhanka telefoonka iyo iimeylka oo ku baxaaya luqadaha af-ukrayn, af-ruush, af-finish iyo af-ingiriis:
 - Waxaad wici kartaa lambarka adeegga Ukrayn ee Hoggaanka socdaalka: **0295 790 605** (Isniin-Jimce, saacadda 8.30–12.00).
 - Waxaad iimeyl u diri kartaa cinwaanka: migri@migri.fi. Waxaad sadarka iimeylka ee loogu talaggalay cinwaanka ku qortaa ereyga ah "Kunta", arrinkaani wuxuu dedejinayaa in farriintaadu ay gaarto dadka khabiirada ah. Waxaad isticmaashaa adeegga loogu talaggalay dirista iimeyllada xogtooda la ilaaliyay ee: securemail.migri.fi.
- Haddii aad codsatay badbaadada caalamiga ah, islamarkaana aad heshay go'aanka oggolaanshaha ah ee codsigaaga, waad codsan kartaa degaanka degmada. Faahfaahinta dheeraadka ah ee arrinkaas ku saabsan waxaad ka akhrisaa bogga u guuritaanka degaanka degmada ee cinwaankiisu yahay [Kuntaan muuttaminen](https://kuntaan.muuttaminen).

2. Degaanka gaarka ah (Yksityismajoitus)

- Haddii aadan doonayn ama aadan awoodin in aad u guurto degmada, waxaad si iskaa ah degaan kummeelgaar ah uga diyaarsan kartaa xerada qaxootiga bannaankeeda. Markaa kuma siinaynno wax magdhow ama kharash guditaan ah oo ku saabsan degaankaaga.
- Haddii aad deggan tahay degaanka gaarka ah, waxaad adeegyada xerada qaxootiga ka heleysaa xeradaadada qaxootiga ee kuugu dhow.
- Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan degaanka gaarka ah waxaad ka akhrisaa bogga internetka ee Hoggaanka socdaalka:
 - migri.fi/asuminen
 - migri.fi/majoittuminen-yksityismajoitukseen

3. U guurista xero kale oo ka mid ah xeryaha qaxootiga

Haddii aadan doonayn inaad u guurto degmada ama degaan gaar ah, waxaan kuu diyaarin doonnaa guri ku yaalla xerada qaxootiga, halkaasoo uu boos ka bannaan yahay. Adigu ma dooran kartid goobta aad dagayso.

- Waxaa laga yaabaa in aannaan guri kaa siin karin agagaarka goobta hadda aad ku nooshahay. Arrinka ku saabsan meesha lagaa siinaayo degaanka, waxaa ay ku xiran tahay tusaale ahaan arrinka ah, in xeryaha qaxootiga ee agagaarka noo dhow uu boos ka bannaan yahay iyo inkale.

Inta ugu badan ee macaamiisha waa ay codsan karaan degaanka degmada

Markaan go'aaminnay yaraynta tirada xarumaha, waxaan fixgalinnay, in xeryaha qaxootiga ee sannadka 2025-ka la xiri doono ay ku nool yihiin qiyaastii 2,200 oo qof, kuwaas oo haddii ay doonaan xuquuqda deganaanshaha rasmiga ah ka codsan kara Finland.

Xeryaha qaxootiga ee la xiraayo

Heshiisyada waxaa la joojiyay ama la kansalay laga bilaabo 1.3.2025, 1.4.2025 ja 1.7.2025.

Xeryaha qaxootiga ee shaqadooda joojin doona bisha Juun ee sannadka 2025-ka

- Xerada qaxootiga ee Kemi, shirkadda Hemcare (Kemin vastaanottokeskus, Hemcare Oy)
- Xerada qaxootiga ee Peiksämäki, shirkadda Kotokunta, (Pieksämäen vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Varkkaus, shirkadda Kotokunta (Varkauden vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Järvenpää, shirkadda Luona (Järvenpään vastaanottokeskus, Luona Oy)
- Xerada qaxootiga ee Porvoo, shirkadda Luona (Porvoon vastaanottokeskus, Luona Oy)
- Xerada qaxootiga ee Satakunta, waaxda laanqayrta case e Satakunta (Satakunnan vastaanottokeskus, SPR Satakunnan piiri)
- Xerada qaxootiga ee Vaasa, Shirkadda xarunta dal u soo guurista ee Pohjanmaa (Vaasan vastaanottokeskus, Pohjanmaan Maahanmuuttokeskus Oy)
- Waaxda qaabilaadda da'yarta ee Kajaani, shirkadda Babando (Kajaanin alaikäisyksikkö, Babando Oy)

Xeryaha qaxootiga ee shaqadooda joojin doona bisha Sibteembar sannadka 2025-ka

- Xerada qaxootiga ee Vantaa, shirkadda Luona (Vantaan asuntopohjainen vastaanottokeskus, Luona Oy)
- Xerada qaxootiga ee Länsi-Uusimaa, shirkadda Luona (Länsi-Uudenmaan asuntopohjainen vastaanottokeskus, Luona Oy)
- Xerada qaxootiga ee Lieksä, shirkadda shirkadda Kotokunta (Lieksan vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Valkeakoski, shirkadda Kotokunta (Valkeakosken vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Forsa, shirkadda Kotokunta (Forssan vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Jämsä, shirkadda Kotokunta (Jämsän vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)

- Xerada qaxootiga ee Riihimäki, shirkadda Kotokunta (Riihimäen vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootigaa ee Kajaani, shirkadda Babando (Kajaanin vastaanottokeskus, Babando Oy)
- Xerada qaxootiga ee Ahvenanmaa, waaxda laanqayrta case e Varsinais-Suomi (Ahvenanmaan vastaanottokeskus, SPR Varsinais-Suomen piiri)

Xeryaha qaxootiga ee shaqadooda joojin doona bisha Diseember ee sannadka 2025-ka

- Xerada qaxootiga ee Oravais, Shirkadda xarunta dal u soo guurista ee Pohjanmaa (Oravaisten vastaanottokeskus, Pohjanmaan Maahanmuuttokeskus Oy)

Xeryaha qaxootiga ee shaqadooda joojin doona bisha Febraayo ee ee sannadka 2026-ka

- Xerada qaxootiga ee Joensuu, shirkadda Kotokunta (Joensuun vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Kuopio, shirkadda Kotokunta (Kuopion vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Mikkeli, shirkadda Kotokunta (Mikkelin vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Rovaniemi, shirkadda Kotokunta (Rovaniemen vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Tampere, shirkadda Kotokunta (Tampereen vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Hämeenlinna, shirkadda Kotokunta (Hämeenlinnan vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Lahti, shirkadda Kotokunta (Lahden vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)
- Xerada qaxootiga ee Jyväskylä, shirkadda Kotokunta (Jyväskylän vastaanottokeskus, Kotokunta Oy)

Noocyada luqadaha